

How to Collect a Pinworm Sample

Read all the instructions before collecting a sample. It's important to follow the instructions so the sample is collected the right way. This will help the test results be correct.

How to Collect a Sample

- Collect the sample in the morning before bathing or using the toilet.
- Take the clear plastic paddle attached to the cap out of the collection container. Do not touch the paddle.
- The sticky surface of the paddle will be marked "sticky side."

Sida Loo Ururiyo Saambal ama Qayb ah Gooryaanka Yaryar (Pinworm)

Akhri dhammaan fariimaha ka-hor ururinta saambalka. Waa muhiim inad raacdid fariimaha si saambalka si sax loo ururiyo. Kani wuxu kaa caawin doonaa in natiijooyinka baadhitaanku sax noqdaan.

Sida Loo Ururiyo Saambalka

- Ururi saambalka subixii ka-hor qubeyska ama isticmaalidda musqusha.
- Caagga balaadhan ee saafiga ee ku dhegan furka ka qaad weelka ururinta. Ha taaban caagga balaadhan.
- Dusha caagga ee dhegdhegga leh waxa ku qoran "sticky side" (dhinaca dhegdheg leh).

(over)

- Separate the buttocks. Press the sticky side of the paddle against several areas of the skin around the anus. Do not put the paddle inside the rectum.
- Put the paddle back into the container.
- Put the cap back on the container. Make sure it is closed tightly.
- Write the patient's name, date of birth and the time the sample was taken on the container label.
- Bring the container back to the clinic right away. Keep the sample at room temperature.
- If you cannot bring the container to the clinic within 24 hours, refrigerate it until you can do so.

- Kala qaad badhida labadeeda qaybood. Dhinaca dhegdhegga leh ee caagga balaadhan ku cadaadi dhawr meel oo ah maqaarka ku wareegsan futada. Caagga ha galin gudaha futada.
- Dib u gali caagga baalandhan weelka.
- Furka dib u saar weelka. U hubso inu si adag u xidhan yahay.
- Waraaqda weelka ku qor magaca bukaanka, taariikhda dhalasho iyo wakhtiga la qaaday saambalka.
- Isla markiiba weelka keen xarunta caafimaadka. Saambalka ku hay heerkulka qolka.
- Haddii aanad weelka gudaha 24 saac ku keeni karin xarunta caafimaadka, ku hay qaboojiyaha illaa ad ka keeni kartid.